# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:09 AM** **HANSARD No.27/03** **Kal-fadhiga 27aad**

**Fadhiyadii 11aad iyo 13aad** **05/April--*30/March/2015***

## Dooda Xeerka Duulista Madaniga oo socotey 2 cisho kana qeyb-qaateen 8 Mudane.

1. **Md. C/qaadir X. Ismaciil Jirde:-** Shir-gudoonka iyo Xildhibaanadaba waad salaaman tihiin, maalintii dhoweyd dhoweyd ee Wasiirku inoo yimi ee aynu su'aalaha weydiinay waxaa ka soo baxay in hay'adda la dhiso, laakiin stakeholderskii, waxaa jirtey qolyo diyaaradaha ka shaqeynayay intii Somaliland jirteyba oo sameyn jirey adeegyo sida cunada, shidaalka, nadiifinta iyo IWM, markaa xeerk iyaga waxba laga soo weydiin.

   Hay'adda la sameynayo ee (Civil Aviation authority) cid cashuur soo rogeysa maaha, adeegyada Diyaaradaha la siiyo waxaa hagaya Wasaarada Maaliyada ama Wasaarada Ganacsiga, markaa hay'addan Civil Aviation-ka adeegyadaasi waa inananey hoos iman, shaqada sidaas baa loo qeybinaya, hadaan xeerka ka hadlo.

   **Qodobka 1aad ee Qeexida:-**
   **"Ganacsiga Duulista ee Isku Xidhka" (Allied Aviation**) waxaa ku jira kireynti (leasing operations), adeegyadii cuntada ee diyaaradaha iyo hawlgalada diyaaradaha alaabta laga rogo, iyo ganacsiga kale ee la xidhiidha, waxaas oo dhami ma khuseeyo Civil Aviationka, markaa waxaan soo jeedinayaa in laga saaro.

   "**Hawl-gelidda Duulista Madaniga ah** "Civil Aviation Operatoins, waxaan ka saarayaa "*diyaaradaha alaabta lagu saaro ama lagaga rogo*" iyo *"cuntada iyo adeegyada isku dhafan"*

   **Qodobka 2aad, Boga 5aad. Xarafka "G"** waxaan ku soo darey *"iyo in la tashiga laga qeyb-galiyo diyaaradaha gudaha laga leeyahey (local carriers)"*

   **Isla Qodobka Xarafka (I)** waxaan ku soo darey ***"Iyada oo aan nidaamkani waxba ka badaleyn heshiisyadi hore ee jirey"*** waayo waxaa jirey heshiisyo hore, markaa hadii sidaa loo qaato waxay noqoneysaa inay heshiisyadaa hore buraan.

**Qodobka 3aad F/2aad Xarafka "D"** waxaan ku soo darey ***"ka dib marka uu Wasiirku Ansixiyo",*** waayo Xeer-nidaamiyaha ay wax ku ganaaxayaan waa in Wasiirku u sharciyeeyo ileyn ciqaab buu waajibnayaaye

**Qodobka 4aad F/1aad** waxaan ka saarey "*Dadweynaha "Public"* waxaana u badaley ***"Shirkadaha Diyaaradaha iyo adeegayaasha Madaarada (local stakeholders)"*** waayo hadeynu nidhaahno dadweynaha ha la soo xuno waxay inaga noqoneysaa reer hebel baa lahaa oo ku jirey, markaa iyadana in public laga daayo oo dadka aqoonteed leh laga dhigo ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 5aad ee Mudada Xilka ee Agaasimaha Guud F/1aad** waxaan ka dhigey "Shan Sano" halkii ay saddex sano ka aheyd, inta dambe ee isla farqadaasna waan ka saarey *"magacaabista Madaxwaynaha ee sadexda xubnood ee Boodhka u horeeya waa inay tilmaantaa mudo kala duwan oo ay xilka haynayaan oo ah sanad, laba sano iyo sadex sano"*

**Isla Qodobka 5aad, F/5aad**, halka xubin cusub dib waa loo magacaabi karaa mudo saddex sano ah waxaan ka dhigay ***"mudo Shan Sano aa"***

**Qodobka 12aad ee Maaliyada (Financial provision), Farqadaha 1aad iyo 2aad** waan ka saarey, waayo hawshaa waxaa leh Wasaarada Maaliyada ee Hay'addani malaha, Khidmada laga qaadayo tikidhka ama adeegyada waxaa iska leh maaliyada, heshiiskuna wuxuu saameyn ku yeelanayaa Wasaarada Ganacsiga.

Hay'adda waxaa u soo hadhaya uun feega oo fee bay qaadaneysaa adeegyadaa ay u qabatey diyaaradaha ee ee maaha khidmada tikidhada.

**Qodobka 13aad** Xeerkani ma fulinayo dhamaan heshiiyadii hore u jirey, markaa waxaan ku soo darey Xarafka "G" oo ah ***"Dhamaan Heshiiyadii hore ee jirey sida Ground Handling-ka iyo Adeegayada kale hay'addo madax banaan maamulaan saameyn kuma yeelanyo xeerkan".***

**Qodobka 19aad** ee Awooda Codsashada Xog, **F/1aad** waxaan ka saaray *"waana inay soo saaraan Warbixin Xisaabeed waafaqsan Nidaamka Caalamiga ah"* waayo civil Aviation-ku malaha inuu yidhaahdo xisaab xidhkiinii keena, waxaa ku leh hadey hanta-dhowr tahey iyo hadey Maaliyad tahey, markaa qaab xisaabdkooda civil aviation-ku kuma laha.

**Qodobka 32aad F/4aad Xarafka "B"** waxaan ka saarey ***"Maaliyadeed"*** maaliyada waxaa iska leh Hanti-dhowrka iyo Wasaarada Maaliyada, sidoo kale waxaan ka saarey isla farqadaas ***"Xisaab-celinahaas loo sameynayo"*** waayo civil Aviation-ku qolada diyaaradaha kuma laha xisaab celin.

**Isla Farqadaas Xarafka "C"** waxaan ka saarey ***"Qoraalada maaliyadeed (Financial records and memoranda)*** " iyana malaha hay'addu waa laga

saarayaa taana, sidoo kale waxaa laga saaraya ***"Risiidhada lacagta qarashaadka ah iyo Muddada Xisaabaadkaas"***

**Isla Farqadaas Xarafka "D"** waxaan ka saarey inta dambe oo dhan ee ah *"habka iyo hanaanka ay dejiso Hay'adu, iyo inay baadho, iyada oo isticmaalay hanti dhawr dhaqaale oo ku xidhan Hay'adda, in sicirka gaadiidka cirka, noocyo, sharci-hoosaad ama dhaqan saamaynaya sicirkaas, ama qiimaha gaadiidka leh sicirkaas, uu yahay mid ka soo horjeeda qodobka 35 ee Xeerkan ama xeer-nidaamiyaha khuseeya. Iyada oo ay shardi tahay in dhamaan khidamadaas (all fares and charges) lagu isticmaalo lacagta gudaha iyada oo dadka ajnebiga ah looga dhigi karo lacag shisheeye"* waxay ka hor-imaneysaa powerskii.

**Isla Farqadaas Xarafka "H"** waxaan ku darey ***"iyadoo la tashi lala sameynayo shirkadaha dalka laga leeyahay"***

**Isla Farqadaas Xarafka "K"** waxaan ka saarey *"maamulidda garoondiyaradeed (aerodrome operator) ama adeeg bixiyaha maamulida marista hawada (air traffic control)",*

**Isla Farqadaas Xarafka "M"** waxaan ku darey ***"Wixii ka baxsan Heshiisyadi hore u jirey",***

**Farqada 11aad ee Qodobkaa 32aad** iyadana waxaan dhexda kaga darey inta highlight-ku saran yahay ee ah **"iyo heshiisyadii hore u jirey ee la galey"** iyadoo noqoneysa Farqadu sidan, *"Xeer-nidaamiyayaasha lagu soo saaro si waaaqsan xeerkan waa inay ku soo rogaan ciqabaad xadgudubyada iyo jebinta xeernidaamiyayasha, taas oo ay ku jirto ka hakinta ama kala noqoshada shahaadda, ruqsadda ama ogolaanshaha, iyo, marka ay la xidhiidho dembi gaar ah, ganaaxyo (fines), iyo iyada oo la raacayo qodobada dastuurka ee la xidhiidha xuquuqda iyo xoriyaadka aasaasiga ah,* **iyo heshiisyadii hore u jirey ee la galey** *inay qaado talaabooyinka (taas oo ay ku jirto dhexgelidda "interception" diyaarad) ee diyaarad dul maray dulka Jamhuuriyadda Somaliland kaas oo in la dul maraa ay tahay mamnuuc"*

**Qodobka 33aad F/3aad Xarafka (iii)** waan ka saarey dhamaanteedba.

**Qodobka 34aad,** Farqad 4aad oo cusub ayaan ku darey taas oo ah ***"hay'addu waa in ay siisaa mudnaanta diyaaradaha madaniga ah (local carriers), lana tashataa inta aaney bixin ruqsad diyaarad ajanabi si loo dhowro danaha shirkadaha wadanka laga leeyahey".***

**Qodobka 35aad** Xarafka "D" ayaan ku darey oo noqonaya ***"Hay'addu waa in ay ilaalisaa danaha shirkadaha Wadaniga ah".***

**Qodobka 37aad,** waxaan ku darey oo ka dhigay sidan *"Hay'adu waa inay u gudataa xilkeeda ruqsadsiinta gaadiidka cirka si waafaqsan xeerka si loo xaqiijiyo in diyaaradaha ka diwaangashan Somaliland "**ama laga leeyahay Somaliland"** ay sida ugu waxtarsan ee ugu suuragalsan iyaga oo bixinaya adeegyo gadiidka cirka ah ula tartamaan marinada caalamiga ah "**hay'adduna inta aaney ruqsad siin ruqsad siin shirkad ajanabi ah waa in ay danta diyaaradaha wadanka laga leeyahay la tashina arrinkaas kala sameysaa si loo dhowro suuqa iyo jiritaanka shirkadaha wadanka laga leeyahay".***

**Qodobka 45aad F/2aad** waxaan ku darey Xubnaha Gudidda maareynta marka aad soo gaadho halka agaasimaha guud ee hay'adda, ***"Shirkadaha Diyaaradaha, Shirkadaha adeega madaarka"*** security baa laga hadlayaa markaa kama maqnaan karaa iyana.

**Boga 40aad Qodobka 66aad** hadaad eegto waxaa ku jira Xisaabaad, markaa in laga saaro xisaabaadka, wixii xisaabaad ku saabsan waxaa iska leh Wasaarada Maaliyada, Wasaarada Ganacsiga iyo Stakeholderska, markaa Civil Aviation-ku diyaaradaha kuma laha operationskaaga xisaab celin ka keen.

**Qodobka 80aad** Waxaan ka saarey **F/2aad Xarafka "C"** dhamaanteed, marka waa in la saaro Xeeka.

**Qodobka 81aad** waxaan ka saarey **Xaraf "A"**

**Qodobka 82aad** waxaan ka saarey **F/2aad Xarafkeeda "A",**

**Qodobka 84aad F/1aad** waxaan ka saarey inta dhexe ee ah *"ama maamulaha garoon diyaaradeed (aerodrome operator), keenaha shidaalka duulista, ama bixiyaha adeeg kasta oo dhulka laga bixiyo, adeegyada saadaalinta cimilada hawada, adeegyada maamulidda marista hawada, adeegyada dayactirka diyaaradaha, ama bixiyaha adeegyda kale ee duulista ee isku dhafan ee la nidaamiyay ee ku qeexan xeerkan amar ama xeernidaamiye"*

**Isla Qodobkaa 84aad F/4aad** iyadana waxaan ka saarey inta dhexe ee ah *"maamulaha garoon diyaaradeed (aerdrome operator), keenaha shidaalka duulista, ama bixiyaha adeeg kale oo dhulka ah, adeega maamulidda marista hawada, adeegyada dayactirka diyaaradda"*

**Qodobka 90aad F/1aad waxaan ka saarey intan casaanka iyo Bold-ka ah "**Xeer-nidaamiye kasta, amar, hage ama tilmaame ama heshiis uu galay Wasiirka ama wasiiradii hore ee maamulayay duulista madaniga ah, kuwaas oo jira marka Xeerkani dhaqangalo, sida ku qeexan qodobka 91 ee Xeerkan, **welina u ah daruuri maamulka, maaraynta, shaqada, lacagta, badqabka iyo nidaaminta duulista madaniga ah iyo garoomada diyuuradaha waxay,**

**iyaga oo aan la raacin laalidda ku xusan qodobka 89(2),** ahaanayaan dhaqangal **ilaa inta ay laalayaan xeer-nidaamiye, amar, hage, tilmaame ama heshiis cusub oo loo soo saaray ama loo galay si Xeerkan waafaqsan"**

**Waxaan intaa ku darayaa:-**

- Xeerkan waxaa loo soo sameeyay, laakiinse xeerka marka la soo sameeyo waa la qarameeyaa, waxaa laga yaabaa ninkani inuu Wasiirka iyo Shaqaalihiisa inuu la shaqeeyo, inagu garsoor baynu nahey oo waxaynu u garsooreyna Fulinta iyo dadweynaha, markaa anigu waxaan ku talinayaa Xeerkan markuu inuu yimi Wasiirka iyo Agaasimaha Guud kaalintoodii bay ka soo qabsadeen laakiin cidii uu dhaqayay waxba lagama soo weydiin, inay dhaqanku noqdo in cid kasta wax la weydiiyo ayaan fiican, wasiirku wuu inoo sheegay inay wada-shaqeyn fiican ka dhaxayso iyaga iyo shirkadaha laakiin iyagana in ra'yigoodii la dhageysto ayaan soo jeedinayaa. WSC.

2. **Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Xogheyntaba waan salaamayaa, waxaan aad ugu mahadnaqayaa Md. Jirde oo aqoontiis hore iyo khibradiisi hore inooga faa'ideeyay, sida uu u soo diyaariyay Xeerka doodiisa, anigu intaan ka hadli lahaa waxaa ka Hadley Md. C/qaadir Jirde, markaa waxaan taageersanahey oo second-gareynayaa dhamaan doodii Md. C/qaadir Jirde, waxaan soo jeedinayaa inay qaadano dhamaan soo jeedimihii Mudane Jirde, WSC.

3. **Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaashaba waad salaaman tihiin, wax badan ku biirin maayo, waxaan anigu leeyahay wixii uu Md. C/qaadir Jirde yidhi ha lagu daro ha lagu daro, wixii uu yidhi ha laga saarona ha laga saaro.

**waxaan kale oo soo jeedinayaa:-**

- in labada nuqul ee Af-ingriiska iyo Af-somaliga isku buug noqdaan oo aan la kala saarin oo noqdaan laba qeybood oo is-fasiraya, hadii khilaaf yimaado la isla eego oo la isla saxo, intaa marka la isku soo guro oo lagu soo daro soo jeedinta Mudanahaas, dib ha loogu soo celiyo Golaha dabadeedna ha la ansixiyo, WSC.

4. **Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-** Shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salaamayaa, sidii uu wasiirkuba ka dhawaajiyay maalintii dhawayd ee uu Golaha yimi iyo agaasimaha guud ee wasaaradu xeerkani waa xeer aad u mihiima oo jamuuriyada Somaliland baahi wayn u qabtay, sida uu wasiirku inoo sheegay waxaa uu xeerkani ka kooban yahay laba qaybood oo aad u waawayn, aasaasiya, waafaqsana hay'adaha caalamiga ah ee duulimaadyada iyo hay'adaha adeegyadan bixiya, halka qaybta labaad ay tahay habdhaqan ay

bulshada caalamku ay ku kala duwan tahay oo qaarkood ay u isticmaalaan hay'ado madaxbanaan oo boodh madaxbanaani maamulo, dawladaha qaarkoodna ay u isticmaalaan kuwona ay hoos yimaadaan wasaarada duulista iyo hawada oo uu (line mister) uu u yahay wasiirku.

Waxaa kale oo uu wasiirki inoo sheegay nidaamka ay qaateed xeerkana way ka muuqataa oo ah in hay'adi ay hoostagto wasaarada duulista iyo hawada.

Siyaasada guud ee uu xeerkani xambaarsan yahay anigu waxaan u arkaa inay macno way ku fadhido isla markaana loo baahan yahay in aad loo dareemo intaas la gudo galin qodobada hoose ee is maamulka iyo habka ay adeegyada u bixinayso.

Waxaan u arkaa in siyaasada guud ee uu xeerkani xanbaarsan yahay inay tahay mid ay keentay baahi aad u balaadhan oo ah madax banaanida hay'adan, hay'adan madaxbanaanideeda iyo jiritaankeeda waxaan aamin sanahay siyaasiyan hadii ay sidaa u dhacdo uu wasiirku u keenay xeerkana ku qoran ee ah in wasaarada duulista hoostagto wax macno ah oo habayaraatee is badalayaa in aanu ku jirin isla markaana ay noqonayso isla wasaaradii duulista iyo hawada oo farac labaad loo sameeyay.

xidhiidhkii caalamiga ahaa ee la doonayay inuu xeerku qabtana waxaan u arkaa inuu ka gaabinayo xeerku oo aanu siyaasad ahaaan u filinaynin adeedyadii loo baahnaa dhamaantood, sidaa darteed waxaan leeyahay marka hore inta aynaan gudo galin qodobada xeerka hala kala saaro wasaarada duulista iyo hawada iyo hay'adan megeceedii lagu soo ururiyay maamulka hay'ada duulista iyo hawada Somaliland.

Waayo marka aad xeerka aragto qodob walba waxaa ku qoran wasiirka oo go'aan ka gaadhaya, wasiirka ayaa soo maamulaya, wasiirka ayaa soo magacaabaya, markaa wax allaale way kaga duwan tahay xafiis gaara oo ay wadaaradu leedahay marjito hay'adani sidaa darteed waxaan leeyahay dib haloogu celiyo Gudidii dibna ha loo kala saaro oo laba halaga kala dhigo wasaarada iyo hay'ada duulista hawada.

Sababaha aan u kala saarayo waxaa ka mid ah hadii aan soo eegno caqabadaha ay ku keeni karto isku xidhanaantoodu ama line mister looga dhigo hay'adan wasaarada duulista iyo hawada waxaa imanaysa laxisaabtan la'aan baa imanaysa oo hadaba jirta, waxaa kale oo imanaysa ku takrifal

awoodii ay hayadani lahayd oo wasaaradu ama wasiirka markaa joogaa uu sida uu doono u isticmaali karo.

waxaa kale oo imanaysa dhicina karta hay'adihii caalamiga ahaa sida hay'ada ICAO ama hay'adaha kale ee deeq bixiyayaasha ah ee ku xidhmi lahaa hay'adaa madaniga ah inay mesha ka baxaan oo deeqihii ay siin lahaayeen meesha ka baxdo sida hadaba dhacda oo hay'ado badan oo wadanka yimid iyo kuwa hawada Somaliland iyo Somalia ba maamula oo ay ka mid tahay sida hay'ada ekaawa waxay in badan dib u dhac ku keentay maamulkaa wasaarada ee ay maamulayso duulimaad yadii iyo hay'ada intaba.

Taasi waxay keeni kartaa lunsi ay hay'adu leedahay ama deeqo ay heli lahay, ha bixiyaan dawlado ama hay'ado kalabee, taasina waxay keeni kartaa shirkadaha wadaniga ah iyo kuwa caalamiga ah ee wadanka yimaadaa inay hoos u siidhacaan horumarkoodu sida hadaba jirta taasna waxaa u sobob ah madax banaani la'aanta iyo wasaarda ay hoos tagayso.

**Sidaa darteed waxaan soo jeedin lahaa** *in kala saaro oo ay hay'adani noqoto mid madaxbanaan ayna yeelato board madaxbanaani maamulo oo madaxweynuhu soo magacaabo oo aan ka badnaan Karin 7 xubnood mudada xilkooduna aanay ka badnaan 3 sanadood ayna samaystaan xeer nidaamiye iyo waxay ku shaqayn lahaayeen oo waafaqsan xeerkan aan hayno.*

Waxaan u arkaa faa'iidooyinka ay leedahay hay'adni madax banaanida noocaas ah hadii la siiyo inay keenayso xidhiidhka caalamiga ah ee ay hay'adaasi la yeelan karayso hay'adaha dhigooda ah inuu noqonayo mid ay awoosiidu uu noqonayo mud buuxda, waxa kale oo 100% noqonaya caawimooyinka iyo tobarada shaqaalu ay helayaan, waxaa kale oo u fududaanaysa la xisaabtanka iyo kormeerka hay'adaha qaranka iyo bulshawaynta caalamka ee caawisa hay'adani iyo adeega ay u qabanayaa shirkadaha wadani ag ah iyo kuwa caalamiga ahba ee maadaaradeena istimaalaba itaasiba waxay noqonayaa kuwo kor u kacay.

**Sidaa darteed waxaan ku talinayaa ugu horayn.**

- *Inaan xeerkan sidaa lagu ansixin*
- *In dib loogu celiyo gudidii*
- *Iyo in la kala saaro hay'dan iyo wasaarada duulista iyo hadawada*

Sida uu wasiirku sheegay markii ay samaynayeen xeerka waxay waxaa uu eegay wadamada aan jaarka nahay sida Ethiopia, Jabuuti, Yemen kiiniya oo uu yidhi waxaan nahay isku kabo, waxaan leeyahay wali maynaan gaadhin heerkaa, waxaan leeyahay waa in laga fogeeyaa nidaamka xukuumiga ah oo ay noqoto.

5. **Md. Baar Siciid Faarax**:- Mudane Gudoomiye, Golaha, shaqaalaha iyo saxaafadaba waan salaamayaa, xeerka intiisii mihiimka ahayd labadii xildhibaan ee iga horeeyay ayaan sheegay waxaanan aad u taageersanahay xildhibaan Ibraahin Mahdi, Md. cabdiqaadir laftiisa meelo badan ayaan ka taageer sanahay waxaan soo dhawaynayaa in ay hay;addu madax banaanaato sida Baanka Boardna loo sameeyo aan ka badnayn 5 xubnood, mudada xilkana waxaan soo jeedinayaa 2 sanadood sababta oo ah hadii ay dad wanaagsan noqon waayaan mudaduna dheeraato waa dhib hay'ad madax banana ha noqoto waad mahadsantihiin.

6. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** Shir-gudoonka ioy mudanayashaba waan salaamayaa, xeerkan oo ah xeer aad u balaadhan aadna u mugweyn isla markaana muhiimadiisa leh, waxaan marka hore u mahadcelinayaa Wasaarada Duulista Hawada oo xeerkan inoo soo gudbisey, xeerkan markaad eegto waa xeer aad looga soo shaqeeyay, xeerka waxaad moodaa xaga luuqada in xoogaa ay yar ka kakan tahey, laakiin guud ahaan waxaad moodaa inuu xeerarkii hore uu ka duwan yahay oo dad aqoon lihi ka soo shaqeeyeen, taasna waa uga mahadnaqayaa Wasaarada.

   **Magaca Xeerka,** inkastoo gudiddu ay magaca kale u soo dhigeen, waxaad moodaa Magaca Xeerka iyo nuxurka uu xambaarsan yahay ay is waafaqsan yihiin, sidaa darteed waxaan magaca Xeerka u deynaynaa sida Xeerka u qorayo, waxaa yar khaldan sida loo qeyb-qeybiyay ama qeyb-qeybta oo aan isku sar go'neyn, tusaale ahaan halkey qeybta kowaad noqon laheyd qodobo badan ayaa hal qodob oo kaliya lagu soo ururiyay, markaa in dib loo habeeyo ayuu u baahan yahay.

   **Qeybta 1aad Qodobka 1aad** ee Erey-bixinta **Farqada 1aad** waxay aheyd hadalkaa oo aan dhameystirneyn in la sii dhameystiro, sidaa darteed waxaan soo jeedin lahaa in lagu daro **"waxaa loo fasirayaa sidan soo socota""** sidoo kale waxaan ku dari lahaa qodobkan ereyad qaarkood marka la sharaxayo in iyagana afsomaliga dib haloo saxo oo dib ha loogu noqdo.

Ereyga **“Ganacsiga Duulista ee isku xidhan”** waxaa ku jirta weedho badan oo runtii aan waafasaneyn sidaa daraadeed waxaan ka saari lahaa inta ku xusan **“hawlgalada diyaaradaha inta ka dambeysa”** waayo maaha arrin khuseysa.

**“Civil Aviation Operation”** waan ka saarayaa waayo adeegyadaa ku xusan maaha kuwo khuseeya

**“Agaasimaha Guud”** Waxaa ka maqan halka “ee lagu assaasey Xeerkan”

**“HDLT”** waxaa loola jeeda heerarka iyo dhaqanada lagu taliyay baa ku qoran, cid ku talisey iyo meel laga keenay ma cada, waana erey bixin oo iyana inay fasiraada raacaan iyo waxay tilmaamayaan waayo hadhow muran baa iman doona oo waxay tahey meesha kuma jirto, markaa waxaan odhan lahaa fasiraad dheeraada ha loogu noqdo waayo waa erayo la soo qaatey uun.

**Qeybta 1aad** Istraatijada iyo siyaasada duulista hawada, markaa qodob uun buu noqonayaaye qeyb noqon maayo, qodobkaasina wuxuu galayaa halkii mabaadiida Xeerka, markaa halkaa istraatiyada waxaynu u badali karnaa, mabaadii oo in dib loo habeeyo ayuu doonayaa.

**Farqada 2aad ee Qodobkaa** waxaa iyana halkaa marka laga hadalyo cida sameyn karta Xeer-nidaamiyayaasha iyo ganaaxyada maamul ama ciqaabaha waxaa haboon xeerarkii kalena in wax lagala tashado, soo jeedinta waxaa iska leh Wasiirka oo marka Xeer-nidaamiye la soo saarayo waxaa ansixinaya Wasiirka ama soo diyaarnaya, markaa halkana kuma jirto Wasiirka, markaa Xeer-nidaamiyaha Maamuladaas wasiirkaa leh waa in wasiirka loogu daro halkaa, xeer-hoosaadyada waa la siin karaa hay’adda wixii maamulka hay’ada ah.

**Farqada 3aad Xarafka “G”** waxaa lagu dari lahaa **“iyo in laga qeybgaliyo hay’adihii diyaaradihii maxaliga ahaa**” oo qodobku waxaa ka maqan qeybtii diyaaradaha localka ah o odhan.

**Xarafka “I”** halka ugu dambeysa waxaan ku sii dari lahaa **“iyadoo aanu nidaamkni waxba ka badaleynin heshiisyadii hore u jirey”** waxaad moodaa markii xeerka la diyaarinayay in xeerarkii hore ee jirey daaqada laga tuurey, markaa waxaan soo jeedin lahaa in iyagana lagu soo daro ileyn waa kuwo lagu soo dhaqmaye.

**Qodobka 4aad ee qeybta 3aad** lagu magacaabey waxaad moodaa in cinwaanka iyo farqada waxa ku qoran inay is khilaafsan yihiin, oo waxaa cinwaanka ku qoran “**Boodhka Hay’adda”** halka hoosena **“Xubinmad Boodhka”** ayaa ku qoran, markaa taasina waxay u baahan tahay in la saxo.

Farqada 1aad waxay tilmaameysaa in hay'addu yeelanayo boodh 5 xubnood ka kooban, wuxuuna ku sii daray in laga soo xulay dadweynaha, Farqada 3aad waxay tilmaameysaa shuruudo laga yaabo dadweynuhuba inaaney lahaan Karin dad xirfad iyo aqoon badan sita mooyaane,  markaa halka contradiction baa ku jira oo iska hor-imanayaan, markaa waxaan odhan lahaa inta hore ee dadweynaha ha laga saaro oo ha lagu daayo shirkadaha Diyaaradaha iyo Adeegayaasha kale ee Madaarka (local stakeholders)ka lagu koobo, si ay u waafaqdo shuruudaha dambe ee farqada 3aad ku qoran.

**Qodobka 5aad** ee Mudada Xilka iyo Waayida Xafiiska **Farqada 1aad** waxaa ku qoran mudo 3 iyo 5 sano, marka waxaan odhan lahaa Mudada ha laga dhigo 5 sano, hadii 3 xubnood la tilmaamey 2 xubnood in mudo xileedkeedi la sheego si kale ayay noqoneysaa, markaa 3 xubnood ee faraqada hore lagu tilmaamey mudo xileedkooduna waa inuu noqdaa 5 sano oo laga saaro 3 sano ayaan soo jeedinayaa.

**Isla farqada 1aad** inteeda dambe waxaa ku qoran "Magacaabista Madaxweynaha ee Saddexda xubnood ee boodhka u horeeya waa inay tilmaamtaa mudo kala duwan oo ay xilka haynayaan oo ah sanad, laba sano, iyo saddex sano" markaa xubno digreeto kaliya lagu wada magacaabey in la yidhaahdo midba in ha hayo cadaalad maaha, sidaa daraadeed waa in laga saaro intaa dambe oo mudo xileedkuudu kuwada dhamaado 5 sano.

**Qodobka 7aad** wuxuu u baahan yahay in erey-bixinta lagu noqdo.

**Qodobka 9aad** waxaa laga hadlayaa awood agaasimaha guud, **Farqada 2aad Xarafka "A" iyo Xaraf "B"** macnaha xeer ay qaadan laheyd ayaa kala duwan, markaa in la isyar weydaariyo oo dib loo habeeyo ayay u baahan yihiin.

**Qodobka 12aad** ee Tigadha Diyaaradaha iyo khidmahada iibka rarka **Farqadaha 1aad iyo 2aad** waxaa odhan lahaa iyana ha laga saaro oo waxaad moodaa inay dheeraad ku yihiin, markaa labada farqadood inta laga saaro ha laga bilaabo farqada 3aad oo ha noqoto farqada 1aad ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 13aad** ee Dhaqaalaha Hay'adda waa qodob aad u balaadhan markaa waxaan soo jeedin lahaa marka hore in la qeybiyo qodobka oo saddex farqadood laga dhigo si akhriskiisa iyo fahankiisuba u fududaado, waa hal farqad oo xarfo u sii kala baxda, halka u dambeysa ayaa u baahan lagu daro heshiisyadii hore loogu soo shaqeyn jirey iyo adeegyadii kale ee hay'adaha madax banaani maamulayaan in xeerarkii ay ku sii shaqeyn jireen ay sidoo dii u jirayaan oo xeerkani saameyn ku yeelan in lagu sii daro mooyee, waxaana ku

sababeynayaa si aan hadhow murar uga iman oo go'aamadii hore muran u keenin in xeerkan la waafajiyo oo lagu daro ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 19aad** ee Xogta ku saabsan, waxaad moodaa in xeerkani ururinta xogta inuu aad ugu talax tagey oo xaataa hay'adihii localka ahaa uu ka dhigey adeegayaal oo aanu u aqoonsan hay'addo jira oo xogtooda iyo diiwaanadooda sidooda u diyaarsan kara, sidaa daraadeed waxaan ka saarey faqrada 1aad inta ah **"waana inay soo saaraan warbixin xisaabeed waafaqsan nidaamka caalamiga ah"** sidoo kale waxaan ka saary oo ku dheeraad ah **"IWM"**oo inta kale la isku xidho faqradaas.

**Qodobka 20aad** ee Shaacinta xog waxaad moodaa qaabka uu udhigan yahay inuu turjumaadii iyo macnihii badaley ama nuxurkii macnaha uu meesha uu ka saaryey, markaa qodobkaasi wuxuu u baahan yahay in dib loogu noqdo oo fahamkiisa la saxo.

**Qodobka 21aad** Diidmada bixinta Xog, sarkaal guud oo dawladu xog u igmatey inuu cid ka doono hadey cidaasi diido xogtaa sidey dambiile u tahey, markaa Xeerka Ciqaabta Guud baa tilmaamaya qofka sarkaal dawladu u igmatey shaqo qofka xog uu ka dooney u diidaa sida dambiile u noqonayo, markaa qodobkaa waxaan raaciyay "sida waafaqsan xeerka ciqaabta guud ee ku saabsan xog bixinta iyo cida diida" markaa intaas ha lagu daro ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 25aad** Aaga illaashan ee garoon diyaaradeed, waxaa ku qoran hay'adda ayaa laga rabaa inay go'aan ka soo saarto, markaa arrintaasi waxa laga yaabaa inay culeys keento, marka Xeerarka danta guud sida Xeer Lr.17 ee dhulka danta guud waxa ka khuseeya in lala akhriyo ayaan soo jeedin lahaa.

Sidoo kale **Qodobka 26aad** ee awooda yeelashada dhul in xeerkaas law no.17 in lala akhriyo ayaan isna soo jeedinayaa, farqada 4aad way tilmaamtey laakiin qaab kale ayay u tilmaamtey ah yeelasha dhul ee hay'adda inkastoo aaney xadidneyn arrinkaas, markaa waa in xeerkaas Qodobada uu ka dhigayo lala akhriyaa.

**Qodobka 32aad** awooda hay'adda ee nidaamka duulista duulista madaniga ah, waxay aheyd xaga hore la dhigo qodobkan, qodobku aad buu u balaadhan yahay oo waa afar beyj, waa awoodihii hay'adda ee xeerka nidaaminaysay markaa in qodobo kale laga dhex sameeyo ayaan soo jeedin lahaa si aan akhrinta iyo fahamka qodobku ulimin ama loogu daalin, markaa halka farqaduhu ku qoran yihiin mid kasta Qodob laga dhigo.

**Farqada 4aad** ee Qodobkaas, xarafka "B" oo ka hadlayaa hay'addaha madaniga ah qaabkey wax u dalban karaan, waxaan soo jeedinayaa in laga saaro kalmadaha **"Istaatikal"** o oaf-ingriis ah iyo "**Maaliyadeed"** oo loo daayo xisaab celin ileyn waxay ka hadleysaa xisaab celine, sidoo kale waxaan ka saari lahaa "Warbixino", markaa farqadani waxay u baahan tahey in dib loo koobo oo dalabka xisaab celin uun lagu koobo.

**Xarafka "C"** waxaa mar labaad soo noqdey oo aan soo jeedinayaa in laga saaro **"qaabka ay noqonayaan diiwaanada iyo qoraalada maaliyadeed"** isla xarafkaa inta dambe ee **"rasiidhada lacagta qarashaadka iyo mudada xisaabaadka"** intaana ha laga saaro.

**Xarafka "D"** isna waxaan ka saarayaa halka ay ka bilaabanto **"habka iyo hanaanka" ilaa** inta ka dambeysa, oo waxaan ku soo koobi lahaa inta hore oo kaliya.

**Xarafka "H"** waxaan ku soo dari lahaa halka dambe **"iyadoo la tashi lala sameynayo shirkadaha dalka laga leeyahay ee madaniga ah"** waayo hadaan shirkadihii dalka wada-tashi lala yeelan iyana meel gaar ah bay ku xidhnaan doonaan oo koley dhibaato iyo culeys baa soo kordhi lahaa, iyaganu aqoon bay u leeyihiin oo qeybaha hore ee qodobka ku qoran shuruudaha badan kooda iyagaa buuxin lahaa.

**Xarafka "K"** waxaan ka saarayaa **"maamulida garoonada diyaaradeed ama adeeg bixiyaha maamulida marista hawada"** intaasi waxaad moodaa inay dheeraad ku tahey, waliba iyadoo arrimaha caymiska aynaanba xeer u laheyn, hadii lagu darona waa in lala adeegsadaa xeer caymiseed bay noqoneysaa.

**Xarafka "M"** xaga dambe waxaan ku soo dari lahaa xageeda dambe **"wixii ka baxsan heshiisyadii hore u jirey"** si xeerku isu raaco madaama aynu xaga hore ku soo nidhi heshiisyadii hore inay xeerkan la waafaqaan.

Farqada 11aad waxaan sidoo kale ku soo dari lahaa **"iyo heshiisyadii hore loo galey"**

**Qodobka 33aad, Faqradiisa 3aad Xarafka "iii"** waxaad moodaa inay xeernimadii ka baxsan tahey, xaga hore shuruudaa ku qoran A, B iyo C ku cad, markaa way is khilaafayaan, in hay'addii xoriyad loo siiyo inay shuruudaha ay doonto keento dee dhibaatey noqneysaa, markaa si aaney isu khilaafin farqada 2aad ee Qodobka iyo farqadani xarafkaas waan ka saarayaa.

**Qodobka 34aad** ee ruqsad siinta ganacsiga gaadiidka circa Farqad 4aad aayaan ku darayaa oo ah **"hay'addu waa inay siisaa mudnaanta kowaad diyaaradaha madaniga ah oo ay la tashataa inta aaney bixin ruqsad diyaarad ajnabi ah si loo dhowro danaha shirkadaha madnaiga ah"** waayo hadeynaan mudnaan siin shirkadihii madaniga ahaa culeys inagu tahey, madaama aynu Golihii Wakiilada nahey waxaan soo jeedinayaa in faqradaas lagu daro, halkana loogu daro sida ruqsadaha iyaga loogu cusbooneysiinayo iley ruqsado hore ayay haysteene.

**Qodobka 37aad** Waajibaadka Guud ee Hay'adda ee la xidhiidha xilka ruqsad siinta gaadiidka, waxaan soo jeedinayaa qaabka ruqsad siinta in mab'da ahaan halkan loogu dhigo xeer-nidaamiyaha lagu sameeyo, lana tixgaliyo ruqsadihii hore u jirey, waxaana ku darey **"ama laga leeyahay Somaliland**" la raaciyo halka ka diiwaangashan Somaliland ka dambeysa.

**Qodobka 45aad** Faqrada 1aad waxaa qoran lifaaq 17aad nidaamka amniga gaadiidka Somaliland, nidaamkaa ma heyno, xeerkana lama soo raacin, waxayna aheyd in xeerka la soo raaciyo si loo fahmo qaabka uu u dhigan yahey, asalkanu waxay aheyd faqradani inay raacdo qodobka istiraariijiyada ee xaga hore ku qornan oo halkan kuma habooneyn.

**Faqrada 2aad** iyadana waxaan odhan lahaa shirkadaha diyaaradaha iyo shirkadaha adeeg bixiyaba in halkan lagu soo daro si ay amniga uga wada qeyb qaataan.

**Qodobka 66aad** ku xadgudubka warbixinada iyo diiwaangalinta, wuxuu la xidhiidhaa qodobkani qodob aan hore u soo sheegney, in la isu geeyo oo la israaciyo ayaan marka hore soo jeedin lahaa, waxaa ku jira qodobkan waxyaabihii aan hore u soo sheegay, sidaa darteed ayaan xagaa ugu rarayaa oo aan wixii aan ka soo saarey kana kaga saari lahaa.

**Qodobka 80aad** ee ah dhaqamada tartanka xorta ah ka soo horjeeda oo waxaa qoran "anti-compettitive practices" oo waxaad moodaa macnihii tafsiirka hagaagsaneyn oo macnaha loo sameeyay waxay xambaarsan tahey oo macno ah ma jirto oo ereyadii af-ingriiska ahaa baa Af-somali laga dhigay, laakiin micnihii xeer ee ay qaadan laheyd meesha kuma jirto.

**Faqrada 1aad** waxay khilaafsan tahey cinwaankii iyo nuxurkii qodobka, markaa waxaan soo jeedin lahaa in la nidaamiyo farqadaas oo dhan, **Xarafka "C"** kali-xooganaan oo laga micneeyay "monopoly position" af-ingiriiskii baa si toos ah loo turjumey oo xataa waxay macno guurineysaa xarfaha hore, marka faqradaasba in laga saaro ayaan soo jeedinayaa.

**Faqrada 2aad iyo faqrada 3aad** in xaga erey bixinta iyo cinwaanka la iswaafajiyo ayay u baahan yihiin.

**Qodobka 81aad** ee magdhowga rakaab loo diiday inay fuulaan diyaarad **Xarafka"A"** waxaan ka saari lahaa " sababtoo ah duulimaadka oo buuxsamey" oo micno iyo sabab malaha.

**Qodobka 82aad Faqrada 2aad Xarafka "A"** ayaan isna ka saarayaa oo aan soo jeedinayaa in laga saaro.

**Qodobka 84aad** wuxuu u baahan yahay in aad la isu dul taago, waayo wuxuu ka hadlayaa caymis, mana lihin xeerar caymis oo meynaan soo saarin, murankuna wuu iman doonaa, xataa waxaa iman kara culeys maaliyadeed oo ay soo kordhin karaan, markaa waxaan soo jeedinayaa in arrintaa aad looga fiirsado, wayna ku qoran tahey inay culeys keenayso.

**Faqrada 1aad** iyada waxaan ka saari lahaa inta ah "ama maamulaha garoon diyaaradeed" ilaa laga gaadhayo **"ee ku qeexan xeerkan ama xeer-nidaamiye"** waayo waxaa qoran waa inay leeyihiin caymis ku filan oo gaadhsiisan masuuliyaadkooda, sharcigan xeer-nidaamiye caymis buu soo saarey, markaa hadeynaanba laheyn xeer caymis, markaa waxaa iman doonta culeys kale, markaa halkaa ha laga saaro ayaan soo jeedinayaa, sidoo kale waxaa la mid ah Faqrada 4aad oo isna leh caymis oo aan ka saarayo inta caymiska kaga saabsan.

**Waxaan soo jeedinayaa"-**

- In xeerkan dib loo habeeyo oo qodobadiisa iyo faqradiiha is raacaan, meelaha turjumada khaldan laga sameeyayna in dib loogu noqdo ayaan soo jeedin lahaa oo kalmada xeerka ku qoran erey-bixinteeda la habeeyo oo qaab sharci laga dhigo sidaynu xeerarka ka dhgi jirney, waxaana taageersanahey Xildhibaan C/qaadir jirde oo aad iiga aqoon badan, intii uu sheegayna waan ku raacsahey.

7. **Md. Maxamuud Jaamac Warfaa**:- waan salamayaa dhamaan mudanayaasha iyo shir gudoonka waan salaamayaa marka hore waxaan taageerayaa doodii uu soo jeediyay Xil maxamd saalaxa waxaanse ku dayaa dhawr qodon aan dul istaago waxaana ka mida arinta masalan arinta (loyalty) oo aan leeyahay halaga daayo ee diyaarada local ah laga qaadayo waxaa leeyahay halaga daayo oo diyaaradaha ajaanibka ah halagu kordhiyo (royalty)

Arinta kale ee aan soo qaadanayaa waxay tahay handling-ka oo hada ay ka shaqeeyaan shirkado ajaaniba ah, oo la doonayo in laga wareejiyo waxaan soo jeedinayaa inloo daayo shirkadahaa wadaniga ah, waxaa kale oo jirta catering iyo cunto siintana iyana waxaan leeyahay haloo daayo shirkadihii hore ugu shaqayn jiray waayo maaha in la taataabto heshiisyadii hore u jiray.

**Arinka caymiska** dalkeenu malahan caymis malahan lakiin diyaaradaha yimaadaa caymis ayay leeyihiin oo tusaale hadii air control-ka hagaya diyaaradu  uu meel jiidhsiiyo caymis aan ku bixino inagu mahaysano markaa aninkaa caymis meesha halaga saaro ayaan leeyahay waayo hay'adani ma qabankarto. Waxaan leeyahay heshiisyadii hore u jiray waa in sidoodii loo daayaa.

Arinta board-ka waa in **2 (laba) xubnood** laga soo daraa stakeholders ka waayo igagaa hawshaa ka warhaya waad maha adsantihiin.

8. **Md. Ibraahim Axmed Reygal**:- dhamaan mudanayaasha iyo shirgudoonkaba waa salaamayaa qaybta aan doonayo inaan ku darsado xeerkan isga ah, sidaa horeba loo sheegay waa xeer wanaagsan oo ay hawl badani gashay, hadii aan gudo galo xeerka oo aan ka bilaabo dhinac eray bixinta, waa turjumaad toosa oo afcarabi ama af ingiriisi taas loo tujumay taasina waxay  luminaysaa macnihii uu lahaa eraygu waxaanan soo jeedinayaa in la habeeyo.

   Tusaale ahaan waxaa qoran erayga (**Rar)** waa eray amar ah markaa hadii la yidhaa **(Rarid)** ayuu sax ku noqonay oo erayga macnihiisu sax noqonayaa.

   **(Adeegyada mushaaxida hawada)** waxaan ku daynlaha ama ay ku haboonta **(Adeegyada Hawada)** ama hadii laga dhigo warbixin adeega hawada waa caadi.

   **Ganacsiga duulista hawada ee isku xidhan** waxaan ku badali lagaa "xidhiidhka Ganacsiga hawada", **Mucaahadadana** waxaan ka dhigilahaa ama aan ku badalilahaa **Heshiisyada** waxaa heshiislagu gaadhay Chicago oo ku saabsanaa heshiisyada.

   **Hawl-galida Duulista madaniga ah** waa eray af-carabiya oo baryahan inagu soo batay markaa eray aan leenahay ayaa jira oo la yidhaa **Hawl-galida Duulista rayidka** markaa kaa aan ku badalno

Erayga **board** waxaan ku badali lahaa oo aan soomaali u leenahay **Guddi** waxaa kale oo jira erayha **daruuri** waa afcarabi waxaanan ku badali lahaa **lagama-maarmaan** Eyaga monopoly waa eray engiriisi laga soo guuriyay waxay afsoomaali ku noqonaysaa **Xuurtaysi** markaa halaga dhigo sidaa.

Waxaa kale oo jira erayga isna **Ruqsad** waxaa kaga haboon soomaali ahaa **ogolaasho** sidoo kale waxaa jira. Hadii aan u imaad qaybta 1aad halka ay ku talo **istaraatijiyad iyo siyaasada duulista hawada** waxaa ka dhigi lahaa ama aan ku badalilahaa **Hiigsiga ama yoolka iyo siyaasada Duulista hawada**

Halka ay ku taalo Somaliland **air space** waxaan ka dhigi lahaa waxaan ku badali lahaa isticmaalka **Bada hawada** Somaliland, sidoo kale waxaan soo jeedin lahaa in mid kamida la isticmaalo Xeer-nidaamiye iyo xeer oo saad oo aan midna mar la isticmaalin

**Qodobka10aad** halka ay ku qorantahay **isdiidaka** waxan ka dhigi la **iska- hor imaadka** Isla farqada 4aad ee qodobkan waxaa ka dhigi lahaa meesha ah **Ajuurada Mushqaayada** intaa markaan ka soo gudbo waxaan soo jeedinmnayaa sidii ay xildhibaanadii horaba sheegeen in eraybixinta iyo turjumaada aan dib u haybayno waayo sida kale xeerkani waa xeer aad u wanaagsan waanad mahadsantihiin.

***Gudoomiyaha:-*** Mudanayaashii dooda is-qorey waa dhamaadeen, waxaan bixinayaa ogeysiis (iclaam) ah in Maalinta Bari Goluhu Fasax yahey oo xogheynta Waaxda Hadal-qoraalku isku soo habeynayso Xeerka, Salaasada oo bishu tahey 07/04/2015 waxaynu ansixin doonaa Xubno Xukuumada ah, Maalinta Sabtidana waxaynu u codeyn doonaa Xeerkan Duulista Madaniga ah, wixii dambe ajendaha dib baan ka sheegi doonaa, Goluhuna wuu xidhan yahay.

***Speaker:-*** *(The House rose at 11.09 AM and adjourned until tuesday, 07 April 2015 at 9.00 AM.)*

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| -------------------------------------------------- | ------------------------------------------ |